

OFFICIAL

Dadka degan
106, 108, 110, 112 Elizabeth Street
RICHMOND

Mudanaha/Marwada guriga degan

Waxaan qoraalkan kuugu soo qoraynaa in aan kula socodsiiino halka ay marayaan howlihii Guryo Dhisida ee Homes Victoria iyo barnaamijka dib u dhiska saraha dhaadheer.

Marxaladdii xigtay ee barnaamijka ayaa hadda ka socota 7 goobood oo cusub. Taasi micnaheedu waxay tahay inay hada meel fiican noo marayaan dhisida aan 9 xaafadood uga dhiseyno guryo loogu talagalay dadka meesha degan hada iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba guryahaas oo noqon doona kuwo ka fiican, ka amni wanaagsan iyo kana raaxo badan guryihii hore. **Warka maanta la shaaciyay ma saameyn doono dhismaha aad degan tahay ama gurigaaga.**

Waxyaabaha maanta lagu dhawaaqay?

Maanta, waxaan dadka guryaha degan kala hadalnay dib u dhiska lagu sameynayo dhismayaashan:

- 25 iyo 27 King Street, Prahran
- 150 Victoria Avenue, Albert Park
- 150 Inkerman Street, St Kilda
- 159 Melrose Street, Waqooyiga Melbourne
- 29 Crown Street, Flemington
- 94 Ormond Street, Kensington

Waxaanu xidhiidh joogto ah lasoo sameyn doonaa dadka degan dhismayaashan dhaadheer.

Laga bilaabo bisha Luulyo 2026 ilaa bisha Febraayo 2028, waxaan si dhow ula shaqeyn doonnaa qoysaskan si aan uga caawinno inay u guuraan guri ku habboon inta ay socdaan howlaha dib-u-dhiska.

Waxaan guryo cusub ka dhiseynaa meel goobta ka ag dhow

Guryo cusub oo tayo leh ayaa durbaba laga bilaabay in laga dhiso meel goobta ka ag dhow si ay uga taageeraan dadka meesha degan fursadaha dib-u-dejinta. Waxaa la filayaa in la dhammeeyo sanadkan waxaana ka mid ah:

- Essex Street, Prahran
- Barak Beacon, Port Melbourne
- Simmons Street, South Yarra
- Holland Court, Flemington

In guryahan la qaboojiyo lana kululeeyo waa ay ka sahlanaan doonaan kuwii hore, dadka ay ku adag tahay dhaqdhaqaaqana way u fududaan doontaa, waxay kaloo lahaan doonaan amni aad u sarreeya, iftiin iyo hawo ay geyaha helayaan intaasna waxaa usii dheer inay leeyihiin balakoono iyo qolal kuu gaar ah oo dharka lagu dhaqdo.

Xaafadaada dhexdeeda

Waxaan sii wadeyaa taageerada dib-u-dejinta ee aan siinayno dadka degan **139 Highett Street, iyo meelaha kor loogu socdo ee Elizabeth Street, Williams iyo Anderson Courts** si ay u guuraan. Ku dhawaad 85% qoysaska ayaa mar hore guuray, ama hada ayay qorsheynayaan inay guuraan, dhammaantoodna waxaa meel fiican u maraya howlaha guuritaanka si ay usoo gebagebeeyaan bisha Febraayo 2026.

Dhanka kale, waxaan xaqiijin doonaa in guryaha la faaruqiyay ay sugan yihiin. Marka la faaruqiyo guryaha kor loogu soconayo, sida ugu dhaqsaha badan ayaan u nadiifin doonaa una sugi doonaa.

Inta ay taaso socoto, waxaan sii wadeyaa barnaamijka dayactirka oo ay ku jiraan amniga oo wax laga qabto, in la casriyeeyo meelaha laga soo galo iyo sidoo kale bannaanada.

Xog ku saabsan barnaamijka dib-u-dhiska

Saraha dhaadheer ee Melbourne xilliyo hore laga dhisay waxaa lagu beddeli doonaa guryo cusub oo buuxiya heerarka casriga ah ee raaxada, gelitaanka, iyo koronto dhaqaaleynta.

Marka dib loo dayactiro dhismeyaalkan, waxaan xaqiijinaynaa in dadka degan guryahaas ay ku noolaan karaan guryo ammaan ah, raaxo leh, oo ku habboon baahidooda hadda taagan iyo tan mustaqbalkaba.

Dhammaan dadka guryaha degan ayaa lagala tashan doonaa qorshayaasha guryaha cusub iyo naqshadaynta xaafadaha. Ma jiri doonto dib-u-dejin loo sameyn doono dadka degan saraha dhaadheer oo bilaaban doonta bisha Janaayo 2028 ka hor.

Nagu xirnoow oo la soco wixii soo kordho

Gurigaaga qayb kama aha howlaha dib loogu dayactirayo saraha dhaadheer, laakiin waxa laga yaabaa inaad aragto isbedelo ka dhacaya xaafadaada. Waan kula soo socod siin doonaa wixii ku soo kordha marxalad kasta oo mashruuca ah.

search **homes victoria**



homes.vic.gov.au



Waxa kale oo aad booqan kartaa websaydkeena homes.vic.gov.au si aad u aragto waxa howlaha aaggaaga ka socda aadna isku diiwaan geliso si aad u hesho wixii war u dambeeyay ee soo kordhay.

Mahadsanid

Simon Newport

Madaxa Fulinta

ee Homes Victoria

28/01/2026

search **homes victoria**



homes.vic.gov.au

